

PATIENT EDUCATION

Baaritaanka Uur kujirta Hoose (Flexible Sigmoidoscopy)

Waa maxay tuubada jilicsan ee qofka dabada laga heliyo?

Tuubada jilicsan ee qofka dabada laga geliyo waxay dhakhtarka ka caawisaa inuu fiiriyo malawadka iyo qaybta hoose ee xiidmaha waaweyn.

Sidee iskugu diyaariyaa tuubada jilicsan ee qofka dabada laga geliyo?

- Dhakhtarkaaga ayaa dalbi doona daawada caloosha lagu diyaariyo. Caadiyan, isku diyaarinta waxaa kamid ah cabida dhalo Magnesium Citrate ah iyo dhameystirida hal ama labo daawada caloosha jilcisa ah kahor baaritaanka, laakiin sidoo kale tan waxaa kujiri kara daawooyinka jilciya caloosha ama wax ka badelida cuntada sidoo kale.
- Haddii horey uu kuugu dhacay kalyo xanuun ama xanuunka kalyaha, u sheeg dhakhtarkaaga.
- Waxaa lagaa codsan doonaa inaad cunin ama cabin wax saqda dhexe kadib habbeenka ka horeeya baaritaanka.
- Dhamaan dahabka waa in guriga looga soo tago.
- Qaar kamid ah daawada aad qaadata waxaa laga yaabaa in loo baahdo in la joojiyo oo wax looga badelo si kumeel gaar ah. Waa inaad kala hadasho dhammaan daawooyinka dhiiga khafiifiya, insuliinta, ama daawooyinka cudurka sonkorta dhakhtarka kuu qora kahor ugu yaraan 2 asbuuc kahor inta aadan marin baaritaanka tuubada dabada lagaaga gelinaayo. Ha joojin qaadashada daawooyinka adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
- Xaqiiji in dhakhtarkaagu oggaado haddii aad uur leedahay kahor maalinta baaritaanka tuubada lagugu gelinaayo.
- Diyaarso darawal iyo qof kula jooga maalintii. Laguuma ogolaan doono inaad gaari kaxeeyso haddii aad qaadata daawada suuxdinta.

Waa maxay waxyeelada ka dhalan karta ee suurtagalka ah?

- Waxyeelooyinka aan habooneyn ee laga dhaxlo kabuubyada.
- Jiixdin ku timaada gidaarka xiidmaha.
- Dhiig bax.
- Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan waydii dhakhtarkaaga.

Maxay tahay inaan fisho kahor baaritaanka tuubada dabada la iga gelinaayo?

- Dhakhtarkaaga wuxuu kuu sharaxi doonaa khataraha iyo faa'idooyinka laga dhaxlo tuubada jilicsan ee dabada lagaa gelinaayo.
- Waxaad saxeexi doontaa foom oggolaansho oo la xariira qaliinka.
- Daawo yar ee laga qaato xididka IV ayaa lagaaga xiri doonaa xididka si lagu siiyo daawada kabuubisa inta lagu jiro qaliinka.
- Waxaa lagaa bixin doonaa ookiyaalayaasha kahor baaritaanka.

Maxaan filan karaa inta lagu jiro baaritaanka tuubada dabada la iga gelinaayo?

- Waxaad u seexan doontaa dhanka bidix.
- Waxaa lala socon doonaa heerarka dhiig karkaaga, wadno garaacaaga iyo ogsijiinta inta baaritaanku socdo.
- Dhakhtarkaagu wuxuu dooran karaa inuu soo gooyo unug yar oo baaritaan lagu sameeyo (unug yar oo kamid ah xiidmaha) inta baaritaanku socdo. Buro yar (burooyin yaryar oo kuyaala gidaarka mindhicirka)

ayaa la soo saari doonaa marka la arko. Soo jarida unug yar oo mindhicirka kamid ah iyo soo bixinta burooyinka yaryar wax xanuun ah ma sababi doonaan.

Maxaan filan karaa kadib baaritaanka tuubada dabada la iga gelinaayo?

- Waxaa lala socon doonaa heerarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga iyo ogsijiinta inta aad joogto aagga soo kabashada.
- Qoyskaaga iyo saaxiibadaa ayaa kula joogi kara kadib baaritaanka.
- Waxaa kugu xirnaan doona ogsijiin muddo gaaban inta lagu jiro marxalada soo kabashada.
- Waxaa laga yaabaa inaad dareento dibiro ama calool istaag kadib marka lagu geliyo tuubada jilicsan sababo la xariria hawada gashay mindhicirkaaga. Sii deynta hawada waxay gacan ka geysanaysaa in dareenkaan kaa dhamaado.
- Haddii aad qaadato Coumadin, Plavix, ama daawo kale oo dhiiga khafiifisa, waydii dhakhtarkaaga wakhtiga aad dib u bilaabi karto.
- Kalkaalisada ayaa ku siin doonta tilmaamaha isbitaal ka bixista oo qoraal ah kahor inta aadan bixin.

Goorma ayaan filan karaa natiijooyinkayga?

- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona waxa lagaa helay kahor inta aadan aadin guriga.
- Waxaad natiijooyinkaaga unugta la baaro ku heli doontaa boosto muddo labo ilaa saddex asbuuc ah.
- Waad wixi kartaa xafiiska dhakhtarka haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah.